

**Sweetened Beverage Tax ee magaalada Seattle (SBT, Canshuurta Cabitaanada  
Macaan) Prenatal-to-Three Community Grant Program**  
**RFP Wehel Kooban**

**HORDHAC**

Department of Education and Early Learning (DEEL, Waaxda Waxbarashada iyo Waxbaridda Hore) ayaa hadda aqbaleysa codsiyada Prenatal-to-Three Community Grant Program (Barnaamijka Deeqda Bulshada Dhalmada kahor-ilaalida-Da'ada Saddex sano) illaa Sebteembar 21 ee kasocda kooxaha daneynayo bixinta taageerada Dhalmada kahor-ilaalida-Saddex ee Black, Indigenous, People of Color (BIPOC, Dadka Madaw, Asalka ah, Dadka aan Caddaanka ahayn), soogalootiga, qaxootiga, dakhliga hoose, iyo bulshooyinka barto luuqadda Ingiriiska. Qiyaas ahaan \$1.4 milyan oo doolar ayaa loo heli karaa lacagta deeqda barnaamijkaan oo gaareysa illaa \$150,000 oo loo hayo kuguuleyste kasta. Habka maalgelinta waa mid lagu tartamaayo waxaana maamula Magaalada Seattle gaar ahaan Waaxda Waxbarashada iyo Waxbaridda. Sababo la xariira in iibinta cabiraanada sonkorta leh (iyo dakhliga ay soo saaraan) lagu saleeyo habraacdo badan, helitaanka maalgelinta heerarka soo saarka sanadba sanadka ka danbeeya.

Natiijada hagaysa maal gelintaan waxay tahay kordhinta taageerada udiyaar ahaanshaha carruurta heerka waxbarasho iyo yareynta farqiyada udhexeeya natiijooyinka caruurta yaryar iyo qoysaska marka laga fiiriyo qolada, jinsiga ama arimaha kale ee dhaqaalaha bulshada. Barnaamijka ayaa looga gol leeyahay in arrintaan

lagu gaaro iyadoo la taageerayo soo jeedinada xog ogaalnimada bulshada taas oo wax looga qabanayo caqabadaha keenaya kala duwanaashahan. Kuwaan waxaa kamid ah siinta qoysaska ee kheyraadka muhiimka u ah iyo adeegyada, taageeridda dhalashooyin siman oo caafimaad ah, kordhinta caafimaadka waalidka iyo badqabka, xoojinta kobcinta iyo ka jawaabidda xiriirka daryeel bixiyaha ilmaha iyo taageeridda caafimaadka cunuga iyo kobcinta ugu habboon.

**UQALMIDA IYO MAAL GELINTA**

Ururada bulshada ushaqeeya kuwaas oo lagu daray kuwa aan faa'iido doonka ahayn ayaa uqalma iney codsadaan, ururada aan lagu darin ayaa looga baahan yahay ka faalo qaad maaliyadeed ee qorshaha. Ururada ayaa uqalma in ay codsadaan ugu badnaan \$150,000 (ugu yaraan codsi ah \$10,000). Ururadu waxay codsan karaan labo nooc oo soo jeedinah:

Maalgelinta Guud ee La heli karo	Codsiyada U qalma	Mawduucyada Barnaamijka/Adeegga
\$1,400,000	Ururada kamidka ah bulshada ee qaybta ka ah ururada aan macaash doonka ahayn  Ururada bulshada ama isbahaysiga aan ka midka ahayn hay'adaha aan macaash doonka ahayn sida isbahaysiyada bulshada, ururada iyo kooxaha kale ee ay xiriirka la leeyihiin	Waxay taageeraan carruurta iyo qoysaska ama waalidiinta dhali raba  <ul style="list-style-type: none"> <li>• Barnaamijyo cusub iyo hindisyo</li> <li>• Waxay taageeraan balaarinta ama hormarinta barnaamijyada iyo hindisaha jira</li> </ul>

	* Shirkad kasta oo aan rasmi ahayn/sharciyeysnayn waa inay sheegato cida kafaalo qaadaysa sannadka oo kusoo qori doona codsigooda heerka 501 ( c ) ( 3 ).	
--	---	--

Mashruucyada kuwaas oo aanan uqalmin fursada maal gelintaan waxaa kamid ah soojeedinada kuwa:

- Bixiya taageerada tayada ama kabitaanka dhaqaale ee daryeelka caruurta ruqsada uhaysta
- Kaliya diiradda saara taageeridda hawlaha guud ee ururka
- Aan lahayn diiradda dhexe ee dhalmada kahor-illaa-da'da-saddexaad
- Diiradda saara u ololeynta siyaasada

Si loogu tixgeliyo maal gelin, soo codsadayasha uqalma ayaa ku casuuman iney kusoo gudbiyaan codsiyada Request for Investment (RFI, Codsashada Maalgelintada) **markey tahay 5: 00 pm waqtiga Seattle Sebteembar 21, 2022.**

#### JADWALKA HOWLAHA LA XIRIIRA RFI

Dhacdada	Taariikhda/Taariikhda uu Soconayo
Dalbashada Codsiyada Request for Proposal (RFP)	Agoosto 31
Muddada Caawinta Farsamada  Kulanka Horey loo duubay	Sebteembar 1 - 21  Waxaa la heli karaa Sebteembar 1
<a href="#">Kulanka Xogta #1</a>  Fiiri Lifaafa Bogga Webka ee <a href="#">Fursadaha Maalgelinta</a>	Sebteembar 6, 6:00 pm – 7:30 pm
<a href="#">Kulanka Xogta #2</a>  Fiiri Lifaafa Bogga Webka ee <a href="#">Fursadaha Maalgelinta</a>	Sebteembar 7, 10:30 – 12:00 am
Dukumiintiga Suaalaha & Jawaabaha lagu cusbooneysiisay bogga <a href="#">Fursado Maalgashi</a> ee DEEL	Agoosto 31 – Sebteembar 16
Wakhtiga kama dambaysta ah ee gudbinta codsiyada RFP	<b>Sebteembar 21</b>
Dib u eegista Waafaqsanaanta Farsamada	Sebteembar 21 – 23

Qiimeynta Guddiga Dib-u-eegista	Sebteembar 26 – 27
Xaqiijinta Qiimeynta Guddiga	Sebteembar 28
Doodaha Guddiga Dib-u-eegista	Sebteembar 29 – 30
Ogeysiiska La-siinayo soo Codsadayaasha	Oktoobar 7
Muddada Racfaanka looga qaadan karo Go'aanka	Oktoobar 7 – 13
Muddada Racfaanka looga qaadan karo Go'aanka	Oktoobar 19 – 21
Muddada Racfaanka looga qaadan karo Go'aanka	Oktoobar 19 – Nofeembar 30
Muddada Fulinta Heshiiska	Diseembar 1, 2022 – Nofeembar 30, 2023

#### CAAWINTA FARSAMADA SOOJEEDINTA QORSHAHA BULSHADA KUSALEYSAN

Bilaash, technical assistance (TA, caawinta farsamada) tooska ah ayaa la heli karaa si loogu caawiyo bixiyaasha hormarinayo soojeedinta qorshahooda oo kasocdo saddex lataliyaal oo bulshada kusaleysan. Waxaan si xoogan udhiiri gelineynaa ka faa'iideysiga caawinta farsamo si loogu taageero horumarinta qorshahaada soojeedin, waafaqsan mudnaansiinta RFI-gan iyo taageerada dib u eegista haggidda farsamo ee request for proposal (RFP, codsashada soojeedin qorshe). Si aad oga faa'iideysato taageerada caawinta farsamo, fadlan xor unoqo inaad la xiriirto mid kamid ah lataliyaasha hoos kutaxan.

Bixiyaha TA	Aasaaska iyo Xiriirka
Catherine Verrenti	Catherine Verrenti waxay ku faraxsan tahay inay hesho fursad ay kutaageerto community based organisations (CBOs, ururada ku saleysan bulshada) kuwaas oo si qoto dheer udhex galay bulshada. Waxay bixisaa xirfadaha iyo aragtida ay ka heshay khibradeeda tooska ah ee labaatanka sano ah, oo ay kujirto Neighborhood House iyo YouthCare. Khibradaan waxaa kamid ah horumarinta deeqda oo ay kujirto horumarinta mareynta ballaaran oo dhaqan ahaan wax utaraya dhalinyarada, taageerada qoyska, waqtiga iskuulka ka baxsan, maareynta kiiska iyo barnaamijyada dadka hoy' la'aanta ah

	Kala xiriir: catherine@verrenticonsulting.com
Hassan Wardere	Hassan Wardere wuxuu ku takhasusay maareynta mashruuca, kaqeybgalka bulshada saxda ah, karti dhisida, isbadel maareynta, qorsheynta istiraatiijiyada iyo iskaashiga, kaalmada farsamo, iwm. Hassan wuxuu ka faa'iideystaa istiraatiijiyad gaar ah ee qiimeynta dhaqamada guriga marka lagu taageerayo fikradaha istiraatiijiyada, naqshadaha guuleysta iyo isdhexgalka hal abuurka, habeynta, barnaamijka sinnaanta iyo adeegyada. Wuxuu sidoo kale leeyahay khibrad ballaaran ee la shaqeynta CBOs oo u adeegga qoysaska soogalootiga iyo qaxootiga. Kala xiriir: projects@bulleconsulting.com
Roxanne Hood Lyons	Roxanne Hood Lyons waxay kor uqaadaa saameynta bulshada iyadoo loo marayo tababarid wax ku ool ah, karti dhisid iyo caawinta ururada ee helitaanka lacagaha. Iyadoo leh khibrada maalgaliye, lataliye iyo fulinta agaasimidda ururada yaryar ee bulshada kusaleysan, waxay kaa caawineysaa sameynta qorsho soojeedin oo ka faa'iideysanayaan shaqaalahaada iyo awoodaha bulshada isla markaana kordhineysa awoodda ururkaada. Kala xiriir: <a href="mailto:roxannelyons@gmail.com">roxannelyons@gmail.com</a>
Jing Fong La xariir: roxannelyons@gmail.com	Jing Fong waxay leedahay waayo aragnimo ka badan 35 sano oo la xariira waaxda dadwaynaha, kuwa gaarka loo leeyahay, iyo hay'ada aan macaash doonka ahayn waana qoraa, tafatire, ku takhusustay istaraatiijiyada iyo arimaha waxbarashada iyo dadwaynaha. Jing markii ugu danbeeyay waxay ahayd maamulaha isku xiraha waxbarashada ee YES! Media. Waana xubin kamid ah Guddiga La-talinta Sinnaanta ee Bulshadeeda. (Fiio gaar ah: Jing Fong waxay iskaashi la leedahay oo ay la shaqeysaa Roxanne Hood Lyons iyo RHL Consulting.)

#### CAAWIYAYAASHA LUUQADA:

Haddii aad ubaahan tahay caawin luuqadeed oo dheeraad ah, DEEL waxay kusiineysaa caawin. Fadlan kala xiriir Tiffany Lee [tiffany.lee@seattle.gov](mailto:tiffany.lee@seattle.gov).

#### MUDNAANSIINTA QORSHE SOO JEEDINTA

Barnaamijka deeqda wuxuu leeyahay labo nooc oo mudnaan ah: 1 Mudnaan ku saleysan sifooyinka ururada ama qorshe soo jeediyaasha laftirkooda, iyo 2. Mudnaan kusaleysan qorshe soo jeedinta mashruuca. Su'aalaha arjiga ayaa loogu talagalay uruurinta macluumaadka si uu utaageero qiimeynta magaalada ee mudnaan kasta.

Ururada soo codsado oo leh sifooyinkan soo socdo waxaa loo mudnaansiin doonaa maal gelin:

1. Matale ah una adeegayo aasaasiyan mudnaanta bulshooyinka
2. Muujiyey qaab dhismeedyo urureed iyo istiraatiijiyadeed si looga qeyb geliyo bulshada, gaar ahaan kuwa leh qoysaska yaryarka
3. Ururada yaryarka oo leh shaqaale mushaarkoodu xadidan yahay

Mashruucyada lagu sharaxay codsiyada deeqda taasoo muujineysa kuwa soo socda waxaa loo mudnaansiin doonaa maal gelin:

1. Keenidda caddeyn ee habka lawada qaabeynta iyo lawada hal abuuridda qorshe soo jeedinta xubnaha bulshada kuwaas oo ka faa'iideysan doono mashruuca
2. Muujiyo sifooyinka mashruuca kuwaas oo dhaqan ahaan wax utarayo oona kor uqaadayo helitaan loo siman yahay
3. Si cad usharaxo una taageero sida mashruucu uu si togan usaameynayo mudnaanta bulshooyinka uuna la kulmo natiijooyinka hagidda barnaamijka deeqda

### **MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Magaaladu waxay bixin doontaa dulmarka guud ee fursada maalgelinta labo kulan oo xog ogaal oo onlayn ah 7-da iyo 15-ka Sebteembar. Macluumaadka oo dhameystiran ee Grant Program ayaa lagu

faafaahiyey **Prenatal to Three Community Grant Program RFI -Dulmarka Guud ee Farsamada**. Waxaan kugu dhiiri gelineynaa in aad ka akhriso dukumiintigaan, faahfaahinta gaarka ah ee kuwa soo socdo ayaa laga heli karaa:

1. Taariikhda, hiigsiga iyo natiijooyinka barnaamijyada deeqda (boggaga 3)
2. Dulmarka guud ee qorshe soojeedinta uqalma (boggaga 4)
3. Habka iyo shuruudda qiimeynta qorshe soojeedinta (boggaga 7)
4. Shuruudaha Miisaaniyadda Deeqda (boggaga 5)

Dhammaan xogta iyo dukumiintiyada codsiga barnaamijkaan deeqda waxaa laga heli karaa: shabakadda fursadaha maalgelinta ee DEEL: <https://seattle.gov/education/for-providers/funding-opportunities/2022-prenatal-to-three-community-grants>